FSAU
Food Security Analysis Unit - Somalia

Hubinta Cuntada iyo Nafaqada

Warbixinta Kooban ee Nofembar 2005

Qodobbada Muhiimka ah iyo siday u Taabanayso

Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Somalia

Waxa la soo saaray November 14, 2005

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Arrimaha Gobolka ee Soo shaacbaxaya

Cinwaanka:
FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka: +254 20 374 5734
Faakiska: +254 20 374 5098
Email:fsauinfo@fsau.or.ke
www.fsausomali.org

Nabad la'aantu waxay ku waddaa in ay halis galiso hubinta cuntada iyo qaab nololeedka koonfurta Soomaaliya.
Isku daygii dhawaa lagu dili lahaa Ra'iisul Wasaaraha TFG, Ali M. Geedi, ayaa timaamaysaa suurtagal-nimada khalkhalin dag- dag ah ee xaaladda siyaasadeed, taasoo si toos ah oo baahsan wax ugu dhimaysa hubinta cuntada iyo qaab-nololeedka. Wararka sheegaya hubka faraha badan ee soogalaya iyo qaybsanaanta siyaasadeed ee ka dhex jirta TFG in macneheedu yahay suutagalnimada iska hor imaadka gudaha ee ku baahsan koonfurta Soomaaliya aan la xakamayn karin. Sidaas darted, feejignaanta guud ee tilmaanta wakhtigaan xaaladda koonfurta Soomaaliya waa baaqi.

- ***Raad-ku yeelashada Waxqabadka:*** *(1) Waxaa mudnaan leh in la sameeyo qorshe haddii ay timaaddo in looga baahdo gargaar bani'aadanimo oo ballaaran koonfurta Soomaaliya. (2) In ay dib u galaan kooxaha siyaasadeed oo dhan wada hadal nabadeed.*

Roobabkii Deyrta 2005 ee daahay yaraadayna ayaa koonfurta Soomaaliya kusoo kordhiyey walaac
Bilowgii roobabka Deyrta (Okt.-Dis.) ayaa kasoo raagay, marka laga reebo meel meel iyo shuux ka da'ay meelo ka tirsan degmooyinka Bakool, Hiiraan iyo Baay. Inkastoy wali dag-dag tahay in la saadaaliyo waxa kasoo bixi kara roobabaka Deyrta, daahitaanka iyo sida yar ee ay u bilowdeen ayaa keentay walaac isa soo taraya, siiba Gu'gii 2005 ee ka horeeyey oo ku yaraa Koonfurta Soomaaliya. Haddii roobabka Deyrtu noqdaan kuwo ka yar sidii caadiga ahayd ama aysan ku di'in koonfurta Soomaaliya waxay keeneysaa: (a) Dalaggii guud ee sanadka soo go'i lahaa (Juun 05 – May 06) in uu noqdo kii ugu hooseeyay 10-kii sano, (b) inuu sababo hoos u dhac ku yimaada helitaankii miraha ee sanadka, iyo (c) si xun u yaraashaha daaqii seerooyinka iyo nolosha xoolaha. Dhacdadaas xumi waxay tarjumaysaa dhibaato cunto yari oo soo badata iyo hubin la'aanta cuntada oo kordhaysa. Eeg Qodobka Cimilada p.2, Qodobka Beeraha p.3 iyo Qodobka Xoolaha p.4

Xoolo-beeralayda iyo Xoolo dhaqatada Gedo iyo Dooxada Jubba oo khatar sare ugu jira Cunto yaraan ba'an iyo Hab-Nololeed dhib leh
Xoolo- Beeralayda, iyo Xoolo dhaqatada Gedo iyo gobolada Jubba oo khatar sare ugu jira cunto la'aan iyo Hab-Nololeed dhib leh labada bilood ee foodda nagu soo haya haddii roobabka Deyrtu yaraadaan ama lawaayo. Baadkii iyo biyihii ayaa horayba si ba'an u yaraaday, xooluhuna way nugul yihiin, qiimaha lo'duna si xoog leh ayey hoos ugu dhacay (50% hoos u dhac ilaa Abril.05), weliba lo' dhimanaysaa lasoo sheegay ilaa Oktobar. Xoolaha kasoo hayaamay Dooxada Jubba iyo koonfurta Gedo, iyo weliba tiro kale oo badan oo kasoo hayaamay Kenya ayaa buuxiyey dhulka wabiga Jubba uu ku faafo, biyaha iyo baadkuna kuma sii filnaan doonaan culayska badan awgiis. Warar dhawaan soo baxay ayaa tilmaamaya in dhammaan Bulshada xoolo-beeralayda ah ay ka tagayaan tuulooyin-koodii iyagoo doonaya biyo iyo baad. eeg Qodobka Xoolaha p3 iyo Dhacdooyinka Gobollada p4

- ***Raad-ku yeelashada Waxqabadka:*** *(1) Il-kuhaynta roobabka Deyrta, hayaanka Xoolaha iyo manfacooda iyo xaaladda guud ee daaqa. (2) Hormarinta mashaariicda horumarinta xoolaha, sida arrimaha adeegga Caafimaadka xoolaha iyo dayactirka ceelasha muhiimka ah. (3) Haddii roobabka Deyrtu yaraadaan, ama lawaayo, waxaa loo baahanayaa hay'aduhu wada jir ahaan u sameeyaan baaritaanno la xiriira xaaladda Dis. 05, kalana shaqeeyaan dawladaha Kenya iyo Itoobiya maadaama ay wadaagaan dhibaatada Daaqa goboleedka dabiiciga ah iyo xuduudyada.*

Deegaanno badan oy dagaallada Gobolka Baay waxyeeleeyeen ayaa ku sugan Xaalad ba'an oo Cunto iyo Hab-Nololeedba leh
Dad lagu qiyaasay 94,000 ayaa hadda ku sugan xaalad ba'an oo dhibaato ee Cunto iyo Hab-nololeedba leh, taasoo ah Digniintii lagu xusay Sebtembar 05 oo ka sii daraysa. Xaaladda Ka sii daridaasi waxaa sababay dhibaatooyin isu tagay oo lumiyey raasamaalkii Hab-nololeedka sababtuna tahay dagaalo is daba joog ah, ayna uga sii dartay dalaggii Gu'ga 05 oo yaraday (31% PWA), roobabkii Deyrta oo daahay yaraadayna, xaaladda guud ee daaqa oo xumaatay iyo fursadaha dakhliga oo aad u yar. Tilmaamaha nafaqo waxay iyana muujinayaan xaalad nafaqo-darro oo ka sii daraysa 3-dii bilood ee la soo dhaafay, taasoo si wayn uga saraysa isbadalkii hore. eegTilmaamaha Gobollada p.4 Jaanntuska p.5 iyo Qqodobka Nafaqada.

- ***Raad-ku yeelashada Waxqabadka:*** *(1) dhexdhexadinta iska hor-imaadka oo muhiim u ah fududaynta howlaha hay'adaha gargaarka ee gobolka. Iminka hayaduhu si fudud uma geli karaan meelahaas, (2) Taageero degdeg ah ee xagga Hab-nololeedka ayaa loo baahanyahay iyo in la sii wado barnaamijyada quudinta iyo caafimaadka.*

Dhacdada ugu xun: Deyrtii oo la waayay iyo nabadgalyo la'aanta baahsan ayaa koonfurta Soomaaliya u horseedi karaan Gurmad wayn oo Bani'-aadanimo.
Dhacdada ugu xun ee, Nabadgalyo la'aanta baahsan iyo Deyrtii oo la waayay waxay u badan tahay in ay u horseedo koonfurta Soomaaliya xaalad gargaar bani'aadanimo. Sidaas darteed, FSAU waxay ku tilmaantay Gobolada koonfurta Soomaaliya in ay ku jiraan Halis Dhexe ee Gargaar Bani'aadanimo. Inkastoon hadda la saadaalin karin, dhicise kadho,, digniintaan hore waxay ku salaysan tahay marxaladahaan isku dhafan: (a) (Deyrtii oo lawaayey oo u horseeday hoos u dhac ku yimid wax soo saar sanadeedka beeraha ee 10 sano gudahood, (b) xiisadaha siyaasadeed ee laxallin waayey waxay keeneen iska hor imaadyo baahsan, taasoo keentay dhimasho badan, barakac, iyo dariiqyadii suuqyada cuntada oo la curyaamiyey, (c) xaaladihii daaqa seerooyinka oo sii xumaanaya, (d) Socodsiintii samafalka bani'aadanimo oo adkaaday Curyaamiyayna ilihii gargaarka ,(e) dagaalladii ka socday Ceel-waaq, Baay iyo Bakool oo sii xumaaday. Iyadoo nabadgalyo la'aantu ay sii xumaan karto xilli iyo wakhti walba, saamaynta roobka xilliga Deyrta ee horraanta Disembar waxaa lagu qiimayn karaa qiyaas sax ah.

- ***Raad-ku yeelashada Waxqabadka:*** *(1) In hididiilo la gasho qorshe dhamays tiran, (2) In ay dib u galaan wada-hadal nabadeed dhamaan dhinacyada siyaasadeed (3) In la joogteeyo kormeeridda Nafaqada ,Cimilada, Amaanka, Daaqa iyo xaaladaha beeraha. FSAU ayaa hoos ahaan ula soconaysaa xaaladahaan oo idil soona gudbin doonta meesha ay wakhti walba marayso.*

Cimilada

Billowgii roobabka Deyrta (Oktober-Disembar) ayaa kasoo daahay koonfurta Soomaaliya. Marka laga reebo shuux yaro ka da'ay meelo ka tirsan gobollada Bakool, Hiiraan iyo Baay, inta badan koonfurta Soomaaliya ma aysan helin roobab xilligii la rabay ee Oktobar (Khariidadaha 1 iyo 2).

Iyadoy roobabkii Gugu (Abril-Juun) aad uga hooseeyeen Koofurta, ayey dib u dhaca roobabkii Deyrtu keentay walaac. Biyo yarida goobaha xoolo iyo beera-dhaqatada iyo daaq li'ida iyo Soo daahidda xilliga Deyrta ayaa dhaawici doona bacriminta iyo kobcinta dalagga beeraha..

Dhanka Woqoyi, roobabku waxay ku bilowdeen wakhtigii la rabay. Saadaasha roobka iyo warbixinnada goobuhuba waxay muujinaysaa in celcelis bileedka roobku gaaray 70mm (Map). Xoogga iyo baaxadda roobkuba way fiicnaayeen kordhiyeenna daaqii iyo biyihiiba Qaybo ka tirsan Togdheer, Sool, Nugaal iyo Sanaag ayaa helay 150% roobabkii caadiga ahaa ee da'ay Oktobar (Khariidada 2). Haddaan barbardhigno xilliyadii hore, roobabkan ayaa ka badan kuwii hore. *Fiiri FSAU Warbixinta xogta Cimilada Nof.2005.*

Khariidadda 1: Oktobar 2005 Isku darka roobka (mm)



Source: USGS/FEWS NET/NOAA

Khariidadda 2:Oktobar Isbeddelka Roobka % qiyaasta mudada dheer



Source: USGS/FEWS NET/NOAA

Suuqyada

Sicirka Shilinka Soomaaliya & Soomaaliland ayaa degganaa sanadkii la soo dhaafay (Ilaa Oktobar 2004). Xilligan Shilinka Soomaaliga wuxuu gaaray celcelis dhan Sosh/US$.15,400,halka shilinka Soomaaliland celceliskiisu yahay SLsh./US$ 6,200 (Eeg Jaantuuska 1). Degenaanshaha labada lacagood ayaa muujinaya farqi-yeelashada ilaa July 2000. Degenaanshaha lacageed ayaa loo sababaa habsami u socodka wadahadalka siyaasadeed ee koofurta Soomaaliya kadib Dhismihii Dawladda Federaalka Ku-meel Gaarka ee Oktoobar 2004.

Eeg FSAU Xogta Warbixinta Suuqa Nov.2005.

Tusmada 1: Isbedelka Shilinka Soomaaliya iyo Soomaalilaand ee Suuqyada Muqdisho iyo Hargeysa, 2000 - hadda.



Nafaqada

Gobolka Baay, Warbixinta goobaha kormeerada Nafaqada (Oktober 2005) aya muujinayaa heer sare ee nafaqo-darro, siiba goobaha xoolo iyo beero-dhaqatada ay saameeyeen dagaallada degmooyinka Qansaxdheere iyo qaybo ka mid ah Diinsoor iyo Berdale ((Kharidadda 3 iyo 4). Waxaa kaloo murug leh, heerka ee uu gaaray jirrooyinkii laga helay caruurtii la baaray labo toddobaad ka hor qiimayntaan Celcelis ahaan 41% ee 378 carruur ah oo laga baaray 9 goobood ayaa la ildarraa cudurrada sida neefsiga, infaction-ka, Shubanka, Mantagga, Qandhada, Gooryaanka. Cudurrada maqaarka, duumada iyo dhiig-yarida.

Baaritaan xooggan oo laga sameeyay koonfurta Gaalkacyo iyo Galgudud ayaa muujinaya nafaqo-darro aad u sareysa, halka koonfurta Mudug ay ka degganta-hay. Degdeg baaritaan ee laga sameeyay 4 dhinac Sebtembar 05 ayaa muujinaya xaaladda khatarta ah ee nafaqo-darro ee laga helay carruurta: wadarta guud ee nafaqo-darro ee 19% (WFH< -2z qiyaasta iyo/ama bararka.) iyo nafaqo-darrada ba'an ee 2.9% (WFH< -3z qiyaasta iyo/ama bararka) Gobolka Galgudud, nafaqo-darro xun ayaa ku habsatay gaar ahaan dadka aan degaanka ahayn.

Eeg FSAU Warbixinta Nafaqada, Oktoobar 2005

Khariidadda 3: Xaaladda Hadda ee Nafaqada (Jan '05)



*Culayska oo loo eego dherarka <-2 qiyaasta la isla ogyahay ee ay dejiyeen NCHS/WHC Khariidaddani waxay ka tarjumaysaa heerar qiyaas ah oo ku salaysan badhiitannada nafaqada iyo xog-uruurin kale.

Khariidadda 4: Xaaladda Hadda ee Nafaqada (Oct '05)



Beeraha

Roobkii Deyrta ee kasoo raagay beeraleyda iyo xoolo-dhaqatada koonfurtu caadi maahayn wayna hooseeyeen. Waxaa dhib weyn ku haya dalagga Deyrtan xumi rays la'aanta ciidda oy weheliso tabo xumida maamulka iyo daryeelka beeraha. Beeraleydu waxay isku dayeen inay dib u abuuraan iyagoo la dhibaateysan qiimaha shidaalka iyo kirada cagafta oo sareeya, siiba Dooxada Shabeelle. Xaaladdu aad bay ugasii xuntahay goobaha roobka lagu beerto. Roob la'aanta awgeed, Kala duwanaanshaha cimilo ayaa raad xumi u keenta beerashada dalagga iyo maamulkooda ee Soomaaliya. Roobabka Deyrta oo horey uga dhammaada xilligooda ayaa keeni kara wax soo saarka dalagga oo hoos u dhaca Intaas marka la raaciyo kulka Jiilaalka (Jan. ilaa Maarso) ayaa horseedi kara xaalado adag siiba dhul beereedka roobka ku baxa ee koonfurta Soomaaliya. Taasi waxay sii murgin doontaa sugidda cuntada ee koonfur Soomaaliya marka loo tixgeliyo dalaggii Guga oo hooseeyey, guud ahaanna soo saarka haruudhku koonfurta 44% Qiyaasta Dagaalka Dabadi (QDD) ama 73,000mt.

Tusmada 2: Celceliska qiimaha Midhaha (Iskudarkaguud ee suuqyada) Billaha



Wax soo saarka haruudhka xilliga-ka baxsan ee Jubbada Hoose/Dhexe ayaa lagu qiyaasay 3,700MT,taasoo u dhiganta 330% soosaarka haruudhka Gu 05. Soosaarka haruudhka xilliga-ka baxsani wuxuu wax u taray baahidii loo qabay haruudhka deegaanka maadaam uu soo saarkii Gu 05 uu xumaa (4% iyo 10% ee QDD kala horreyntaas ee Jubbooyinka Hoose iyo Dhexe). Balse, xitaa markii laysu geeyo soosaarkan xilliga-ka baxsan iyo Gu 05, waxay u dhigantaa 27% ee Gu' QDD. Sannadka wanaagsani, soosaarka haruudhka Deyrtu wuxuu ku kordhiyaa 20% soosaarka haruudh sanadeedka. Gobollada Shabeelle iyo Hiiraan, soosaarkooda xilliga –ka baxsani kutala gal malaha maadaama guul-darro kaga timid kul raagay iyo cayayaan badan. Beeraleydu waxay door bideen, siiba Hiiraan, inay u iibiyaan dalaggoodii bal ahaan. Soosaarkii Gu/Karan ee beer iyo xoola-dhaqatada Woqooyi- Galbeed ayaa la filayaa dhammaadka Noofembar lana filayaa inuu noqdo caadi ama ka sarreeya, beeraleydana roobabkii fiicnaa ayaa ku dhiira geliyey beeridda meseggo iyo gelley waqti-gaaban ku baxa.

Soosaarkii haruudhkii Gu 05 ee koonfurta Soomaaliya ayaa noqday kii ugu hooseysay tobankii sano (73,000 MT), maadaam mesaggadii iyo gelleydiiba dhibaato kala kulmeen roob-yari soona daahay, daadad, cayayaanno, iyo nabad-gelyo darro ka jirtay meelaha qaar. Sanadkan soosaarka haruudhka (marka laysu geeyo Gu' 05, Xilli-ka baxsanaha, iyo Deyr 05/06), lagu saxay soosaarkii xilli-ka baxsanaha iyo dhacdo Deyr xumi ah (dhacdo laga soo qaatay qiyaasta seddexdii Deyr ee ugu hooseeyey – ama 51,000 MT) ayaa lahelayaa dalag haruudh oo dhan 159,000 MT, taasoo ah 55% QDD ee soosaarka sanadlaha haruudhka QDD. Hadday dhacdadani timaaddo, waxay noqonaysaa soosaar sanadlihii ugu hooseeyey muddo toban sano ah.

Qiyaasta FSAUshaxda dheelitirka haruudhka ee sanadka (Juun 05 – May 06), natiijada guud ayaa muujinaysa inaysan jiri doonin hoos u dhac haruudh ee suuqa (FSAU, lambarka tirada farsamo No. IV.7, Baaritaankii Gu, Setembar 13, 2005). Xogta dhiman ee shaxda dheelitirka haruudhku waxay ku jaan go'antahay qiyaasta dalaggii Gu 05 iyadoo la filayo "caadi" ama dalagga Deyrta 05/06 oo dhexdhexaad noqda. Shaxda dheelitirka haruudhka hadda waa lagu noqday si loo tixgeliyo hoos u dhaca soosaarka Deyrta loona baxsho digniin iyo qorshe (Jadwalka 1). Afar jeer ee dib loo eegay shaxda dheelitirka haruudhka (Juun 2005 ilaa May 2006) dhacdooyinkaas ayaa lagu bandhigay Tusmada 1:

1 Soosaar hooseeya ee dalagga Deyrta (laga qiyaas-qaatay celcelika soosaarkii seddexdii Deyr e ugu hooseeyey 10kii sano ee la soo dhaafay)
2 Soosaar hooseeya ee dalagga Deyrta sida kor ku xusan balse dib loo eegay qiyaasta dibadda laga keeno iyadoo latixgelinayo qiyaastii 25% inay usii dhaafaan Itoo biya iyo Waqooyiga Kiinya.
3 Dhacdada ugu xun ee soosaarka Deyrta, taasoy dalagga waraabka iyo dalagyada biyo-fadhiga oo bislaada, iyo
4 Dhacdada ugu xun ee soosaarka Deyrta sida kor ku xusan, balse dib loo eegay qiyaasta dibadda laga keeno iyadoo latixgelinayo qiyaastii 25% inay u usii dhaafaan Itoobiya iyo Waqooyiga Kenya.

Dhammaan dhacdooyinkan cuntada kaydka gargaarka, midda jidka kusoo jirta, iyo midda qorshaysan ayaa laga saaray cadadka la qaybiyay ilaa hadda, maadaama dhibaatooyinka soo wajahay hey'adaha gargaarka ay ka midyihii gelid la'aanta koonfurta Soomaaliya, iyo weliba afduubka Maraakiibta xeebaha Soomaaliya, iyo nabad-gelyo xumida ka jirta.

Gunaanad, seddex kamid ah afarta dhacdooyin ayaa muujinaya hoos u dhac ku yimaada helitaanka haruudhka (Jadwal 1). Shaxda dheelitirka haruudhku waa un tusaha guud ee suuqa haruudhka, waxba ka sheegi mayso awoodda helitaan, taasoo dhib u keeni doonta gobollo badan. Yaraanta hababka dakhliga lagu helo iyo is bed-bedelka suuqa oy sii xumaysay nabad gelyo xumidu, ayey kaliftay inay qoysas badani ku tiirsanaadaan habnololeed xun lana soo gudboonaato cunto yari.

Tusmada 2: Celcelishka Qiimaha Dalagga ee Gobollada Bishii (SOSH)

Tusmada isu-dhelitirka Dalagga Soomaaliya ee sananadkii (Juun 2005 to Maay 2006)	Warbixinta Gu Dabadi [1]	*Dhacdada: Dalagga Deyrta oo Caadiga ka hooseeya (50% of PWA) ('000 MT)*		*Dhacdada: Dalagga Deyrta oo aad u liita (30% of PWA) ('000MT)*	
	Soosaarka Gu 2005 ('000 MT)	(Dhacdo 1) 100% [2] Ganacsiga Dibadda laga keeno	(Dhacdo 2) 75%[3] Ganacsiga Dibadda laga eeno	(Dhacdo 3) 100%[2] Ganacsiga Dibadda laga keeno	(Dhacdo 4) 75%[3] Ganacsiga Dibadda laga keeno
KAYDKA DALKA GUDIHIISA LAGA HELO	245	183	183	164	164
Kaydka lagu bilaabo ee Sanadkii hore kasoo haray	24	24	24	24	24
Saadka Dalagga haruudhka yaalla gudaha 2004/05	221	159	159	140	140
Gu 2005 Koonfurta Soomaaliya	73	73	73	73	73
Gu-Karan 2005 Waqooyi-galbeed	31	31	31	31	31
Xilli-kabaxsanihii Gu 2005	9	4	4	4	4
Deyr 2005	108	51	51	32	32
Dalagga lagu isticmaalo gudaha dalka					
Baahida Haruudhka la Isticmaalo	633	633	633	633	633
BAAHIDA DALAGGA BAAHIDA LAGA KEENO					
Ganacsiga la filayo in dibadda laga keeno	395	395	303	395	303
Cunnadii la qaybiyey	6	26	26	26	26
QIYAASTA DHEERAADKA/YARAADKA – HARUUDH	13	-29	-121	-48	-140
Kaydka Cuntada Gargaarka ah, Jidka kusoo jirta ama la qoondeeyey	43	30	30	30	30
WADARTA QIYAASTA DHEERIGA /YARAANTA – HARUUDH [4]	60	0	-90	-20	-110

1. Saadaashii lagu sameeyey FSAU 2005 Falanqayntii Warbixinta Gu Dabadi.
2. U-qaadashada in Haruudhka la keenaa ku sugnaanayo Gudaha.
3. U-qaadashada in boqolkiiba 30 ee kasoo kala dega dekedaha Berbera iyo Boosaaso, iyo boqolkiiba 10 ee kazoo kala dega dekedaha Ceel- Macaan iyo Jasiira ay u sii gudbi doonaan Itoobiya iyo Bariga Kenya.
4. Lagu koobay tobanka ugu dhaw.

Xoolaha

Xaaladda xooluhu aad ayey uga sii dareysa deegaanno ka mid ah koonfurta Soomaaliya, siiba deegaannada xoola dhaqatada iyo beero-iyo xoolo dhaqatada ee gobollada Gedo iyo Jubbooyinka. FSAU.waxay ka saadaalinaysaa gobolladaas cunno iyo nolol xumi ba'an labada bilood ee soo socda haddii ay Deyrtu qiyaasteedii ka hoos marto (eeg khariidada 5). Lo' ku dhimatay ayaa horayba looga soo sheegay oogada Gedo iyo Jubbooyinka, siiba nawaaxiga ceelasha biyaha sababtoo ah baad iyo biyo la'aan. Goobihii biyaha iyo baadkuba horay ayey u marten sababtoo ah Gugii 2005 ayaa qiyaastiisii hoos uga dhacay (Abril – Juun), taasoo keentay horraantii (May/Juun) hayaamid ay dadkii iyo xoolihiiba ugu guuraan dacallada webiga Jubba iyo xeebaha Kismaayo. Raagiddii iyo yaraanta roobkii Deyrta 2005 (Oktobar – Disembar) ayaa u horseedaya xaaladdu inay sii xumaato.

Warbixinnada nooga imanaya gudaha ayaa xaqiijinaya inay cidloobeen tuulooyin badani ee ahaa beero iyo xoolo dhaqato ee deegaannada Baardheere (Gedo), Saakow iyo Bu'aale (Jubbada Dhexe) bishii Oktoobar iyagoo ka raadsanaya daaq iyo biyo dacallada webiga Jubba. Xoolihii oo caatoobay ayaa sababtay inay caano yareeyaan sicirkoodiina hoos u dhaco. Sicirka lo'da ee Gedo iyo Dooxada Jubba ayaa hoos ugu dhacay horraantii sanadkan. Ilaa Abril 2005 sicirka lo'da ayaa hoos ugu dhacay 46% degmada Baardheere (Gedo) sidoo kalana 50% Afmadow (Jubbada Hoose Bishii Oktobar. dhimashada xoolaha gaar ahaan lo'da ayaa laga soo sheegay koonfurta Gedo iyo weliba Afmadow iyo Xagar ee gobolka Jubbada Hoose.

Tusmada 3: Qimah Dhexdhexaadka Bisha Lo' da La Dhoofiyo ee USD



Tusmada 4: Xoolaha laga Dhoofiyo Berbera iyo Bossaso iyo Qiimaha Adhiga Teyada Dhoofinta leh ee USD



(Jaantuus 5) Berbera iyo Boosaaso ayuu gaaray dhoofinta xoolaha (neefkii) iyo dhoofinta qiimaha Ariga (US$).
Bishii hore ayaa xoolihii ugu badnaa la dhoofiyey, iyadoo loo aanaynayo ariga tayada leh ee suuqyada soo gaaray iyo kororsiimaha dalabka ka imanaya Gacanka Ciid –Al-Fitri awgeed, iyo weliba u diyaar garowga iibka xoolaha loo dhoofiyo xajka ee toddobaadka hore ee Janwari (Jaantuuska 4)

Qiimaha idaha iyo riyaha (ariga) tayada leh ayaa kasii kordhay bishii hore in dhan 20% Boosaaso, qiyaas ahaan US$25/neefkii bishii Sebtemba gaadhayna US$30/neefkii bishii Oktobar (Jaantuus 4). Qiimaha xoolaha la dhoofiyo ayaa muujinaya kororsiimo ilaa iyo xayiraaddi 2000/2001, iyagoo ku dhawaaday heerkii xayiraadda ka hor. Inkastoo ay tirade la dhoofiyaa soo kabanayso, haddana ma gaarin heerkii xayiraadda ka hor (Jaantuus 5).

Caadiyan xoolahu way ka guuri jireen dacallada webiga xilligan oo kale sannadkasta, balse, raagidda curashada Deyrta (Oktoobar – Disembar) ayaa ku khasbaysa ku nagaadshaha dacallada webiga. Tani waxay u keeni doontaa khatar ba'an oo kaga timaadda xoolaha cudurrada ka dhasha dhuugga ee dacallada webiga.

Intaa waxaa sii dheer, daaqii iyo biyihii oo kusii yaraanaya dacallada webiga oon dabooli Karin baahida xoolaha fara badan ee kusoo hayaamaya. Dooxada Jubba martigelinteeda xoolaleyda Jubbada iyo koonfurta Gedo waxaa u dheer tiro aad u badan oo xoolodhaqato Kenyan ah oo uga soo hayaamaycy Woqooyi Bari Kenya iles bishii Juun.

Waqooyiga iyo gobolada dhexe helitaanka biyaha iyo daaqu wuu ka sarreeyaa sidii caadiga ahayd iyadoo ay sababtay roobabkii badnaa ee ay heleen labadii xilli ee isku xigay. Xoolihii ayaa aad u dhalay oo caano iyo subag ayey qoysasku helaan. Guud ahaan, kasoo kabashadii abaarihii ee Sool iyo Dooxooyinka Nugaal ayaa sii socota.

Dhoofinta idaha iyo ariga ee dekedaha Boosaaso iyo Berbera ayaa aad u kordhay gaarayna Oktobar 335,996 neef, una dhiganta korsiimo dhan 60% marka loo eego bishii la soo dhaafay (Khariidad 4) wadartan guud ee la dhoofiyey, 142,554 ayaa laga dhoofiyey dekedda Berbera xagga intakale 193,442 laga dhoofiyey dekedda Boosaaso.

Tusmada 5: Berbera iyo Bossaso: Ganacsiga Xoolaha la Dhoofiyo (Madaxa) iyo Qimaha Adhiga la Dhoofiyo



Isdhexgalka Baarista Hubinta Cuntada: Arrimaha kasoo shaac-baxaya Gobollada

Woqooyi

Waqooyi-Bari- roobabkii *Deyrtu* caadi ayey ahaayeen ama kaba sareeyeen bishii Oktobar marka laga reebo qaybo ka tirsan waqooyi Bari (Dharoor iyo Qaab- nololeedka Golis). Labadii xilli roobaad ee hore oo wanaagsanaa awgood, ayey biyuhu, cawsku iyo xaaladaha xooluhuba wanaagsanyihiin dhammaan deegaannada gobolku. Kororsiimada dhalmada geela ayaa bilawmi doonta bisha Noofembar, taasoo kor u qaadi doonta guud ahaan nolosha xoolo-dhaqatada. Kala beddelashada badeecooyinka ayaa kasoo raynaysa xilligan dhoofka xoolaha (inta u dhaxaysa Soonka iyo Xajka). Bilawga xilliga kalluumaysiga (Noofembar – Maarso) iyo shaqooyinka ka dhalan doona ayaa u faa'iidayn doona bulshooyinkii ku waxyeeloobay Sunaamidii iyo shaqaalaha kalluumaysiga u yimaada.

Waqooyi-Galbeed, inta badan waqooyi- bari waxaa laga helay caadigii ama ka badan roobabkii bisha Oktoobar, marka laga reebo qaybo ka tirsan koonfurta gobolka Awdal. Rajo-wanaagga xoolo- dhaqatada ayaa sarreysa taasoo ka dhalatay xoolihii oo kasoo kabanaya, arigii iyo geelii oo dhalaya, iyo anfaca xoolaha oo soo kordhaya. Dalaggii Karan/Gu ayaa la filayaa dhammaadka bisha Noofembar iyadow weliba roobabkiii ay dhiiri-galiyeen beeraleydu beerashada gelley iyo meseggo waqti-yar ku baxa. Qiimaha shiidaalka oo sii kordhaya ayaa culays ku haya beeraleyda (0.66 USD/ Literka shidaalka ee Agoosto, 0.81 USD ee Sebtembar).

Dhexe

Roobabkii Deyrta ee gobollada dhexe ayaa ahaa kuwa caadi ah ama ka hooseeya qiyaastoodii. Warbixinnada ayaa muujinaya inay biyo-qabatimadii biyo galeen. Caabudwaaq iyo Goldogob ayaa helay roobab fiican, taasoo keentay inay jirka xoolahoodu qurxoonyihiin. Hay-aamidda xooluhu way yarayd sababtoo ah daaq iyo biyo waran deegaanno badan iyo nabadgelyadii oo ka soo raysay. Waxaa xaaladdaas ka duwan deegaannada xeebaha Ceel-dheer, agagaarka Bohol iyo goobo kale oo uu daaqu ku yaraa. Degmooyinka sida Cadaado, Galinsoor iyo Hobyo ayaa kacsan kadib dagaalladii hore oo sababay khasaare raasumaal suuq xumo. Warbixinno aan la xaqiijin ayaa muujinaya xaaladaha nololeed ee deegaannada Dhuusamareeb (Qaxootigii ka yimi Xeraale), Cadaado (Qaxootigii ka yimi Bandiiradley) iyo Wisil iyo Colguula (Qaxootigii ka yimi Hobyo) ay kasii darayso.

Koonfur

Hiiraan, roobabkii *Deyrta* ayaa wqatigoodii bilawday balse ahaa kuwa liita oon ku baahsanayn dhul beereedka. Waadiyada iyo togogga ayaa qalalan roobkoo yaraa awgiis. Roobabku way hagaajiyeen baadkii iyo biyihii seerayaasha hab-nololeeyada inkastoo daaqa furan uu sii yaraanayo sababo la xiriira kala guurka qabiileed.. Ma jirto khatar cusub oo daad soo rogo wabiga Shabeele ee Hiiraan, laakiin lasocod ayuu u baahanyahay. Dhuldiyaarintii Deyrta ayaa dib u dhacday sababo badab awgood, sida sarraynta sicirka shidaalka iyo dalaggii hore oo soo gaaray Deyrta.

Bakool - roobab wanaagsan oo ka da'ay Tiyeeglow iyo Xuddur ayaa sababay usoo hayaamidda xoolaleyda ka imanaysa deegaannada Rab-Dhuure, Ceelberde iyo Diinsoor. Meelaha kale roobabka Deyrtu ismahaysan weyna koo-koobnaayeen. Xiisaddii ka dhalatay dhul daaqsimeedka Rab-dhuure iyo Ceelberde ayaa kacsan taasoo horay u dhalisay qaxooti dhan 250 qof ee kusugan Buurdhuxunle ee Degmada Waajid, dhibna u geysatay ganacsigii iyo tacabkii beeraha.

Bay - hubinta cuntadu way kasii daraysaa Qansax dheere iyo Qaybo katirsan Degmada Diinsoor sababtoo ah beerihii Gu'ga oo xumaaday oy weheliso isku dhaca qabiileed oo keenay barakac iyo baaba' raasumaal, iyo raagidda roobkii Deyrta. Waxaa lagu qiyaasay 94,000 oo qof inay hayso cunno iyo nolol-xumo. Biyo yari xun ayaa lagasoo sheegay tuulooyinka Habiibayaal, Tugaar-Hoosle, iyo Raaxoole ee degmada Diinsoor.

Shabeelooyinka Dhexe iyo Hoose - roobabkii Deyrtu way ka curteen Shabeellooyinka Hoose iyo Dhexe, laakiin ma baahsanayn. Roobab fiican ayaa ka da'ay bishii Oktoobar degaannada Tortorow ee degmada Afgooye, Farsoolay ee degmada Qoryooley, Jowhar iyo mahadaay ee Shabeellada dhexe, halka goobo ka tirsan degmooyinka Merka, Baraawe iyo Sablaale roobku ku yaraa. Meeshii roobku ku fiicnaa, daaqu waa fiicnaa lo'diina way ka fogaatay dacallada webiga, halka dhulka beera-roobaadku kasii socoto dhul diyaarin, shinniyayn iyo falkiiba. Balse, saadaal-dhaqmeedku waxay inshaaraysaa, marka lagu saleeyo dhadada lagu arkay beeraha in Deyrtii sii dhamaanayso. Sicirka galleyda ayaa hoos usii dhacaya iyadoo kaydkii la iibinayo si loogu helo dhaqaale lagu tacbo beeraha. Sicirka galleydu wuxuu ka marayaa US$ 0.13/ Kg marka loo eego qiimihii US$ 0.24 ee bishii Juun. Isku-beddelashada badeeco (galley iyo shaqo) ayaa hagaagay, gaarayna 34% marka loo eego bishii hore.

Jubbada Dhexe/Hoose - xilligii Gu'ga 2005 daadadkii wabiga Jubba inta u dhaxeysa koonfurta Gedo iyo Jamaame ayaa waxyeeleeyey dalaggii taagnaa qiyaas dhan 80-90% taasoo u keentay bara-kac bulshooyin badan oo beeraley iyo reer magaalba leh. Balse, faa'iidada daadadku waxay ahaayeen beerashada dhulkii biyo-galeenka ahaa (eeg Taxanaha Farsamo ee FSAU. Warbixinta Lam. IV.713 Sebtembar, 2005). Dhawaantan qiimayntii FSAU ee soosaarka dalagga xilliga (27th Oktober - 5th Nofembar 2005) ee Jubbada Dhexe (degmooyinka Bu'aale iyo Saakow) iyo Jubbada Hoose(degmooyinka Jilib iyo Jamaame) ayaa lagu qiyaasay wadarta dhulkii la beeray ilaa 15,210 hiktar iyo 620 hiktar kala horreyntaas. Qiyaas ahaan wadarta la soo gooyey intii u dhaxaysay Oktobar iyo Nofembar ee wadarta labada gobol oo ahaa 3, 080 MT oo galey ah, 640 MT oo digir ah, iyo 430 MT oo Sisin ah.

Xaaladihii ka dhashay roobabkii yaraa iyo xaaladda seerooyinka ee dhulalka xoola dhaqatada ku yaal dooxada Jubba xilligii Gu'ga 2005 ayaa sababay in lo' badan loo hayaamiyo dacallada webiga iyo xeebaha. Soo raagiddii roobabki Deyrta oo teel-teel ahaa ayaa sababay inay lo'dii isugu soo ururaan (kabilow koonfurta Gedo degmooyinka waqooyi-bari Kenya) dacallada webiga, geeluna gaaro ilaa degmada Kismayo. Lo'da kusii hartay dhul xoolaadka banka galbeed (degmooyinka Saakow iyo Afmadow) ayaa xaalkoodu liitaa, caanuhuna ku yaryihiin, lo' dhimatana laga soo sheegay.

Khariidadda 5: Guga Kadib(July 2005) Qoondaynta ay arrimo badani ku jiraan ee Xaaladda Hubinta Cuntada



Warbixinaha Soo baxay:
Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWSNET, November 12, 2005.
Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET, November 12, 2005
Warbixinta daadedka Somalia Nov 8, 2005
Warbixinta roobabka Somalia Nov 11, 2005
Warbixinta diiwangelinta miraha gu iyo karan, Bartamaha November
FSAU, Daabacaad waxaa laga heli karaa FSAU - website www.fsausomalia.org